

## Guddiga Caruurta iyo Dhalinyarada

Guddiga waa hay'ad madax-bannaan oo kor u qaadaysa danaha iyo ammaanka caruurta iyo dhalinyarada Victoria. Ayadoo la eegayo Heerarka Ammaanka Ilmaha, doorkayaga wuxuu ku lug leeyahay:

- siinta macluumaad, talooyin iyo taageero haya'daha si ay uga caawiso abuuridda kartidooda si ay ugu haboonaato Heerarka Ammaanka Caruurtuna ay u noqdaan kuwo ilmo ammaana
- wax-barista iyo siinta talooyin ku saabsan maalgeliyayaasha dawladda iyo qaanuun sameeyayaasha si kor loogu qaado ku haboonaanta heerarkaas
- sameynta wareysiyo lala yeesho haya'daha haddii aanu qabno dareen ku saabsan haddii ay yihiin goob ammaan u ah ilmaha iyo, haddiiba loo baahdo, qaadidda tallaabooyinka fulinta.

## Wax ku saabsan Heerarka Ammaanka Ilmaha

Laga soo bilaabo 1dii Janaayo 2017, Heerarka Ammaanka Ilmaha waxaa hirgeliyey dhammaan haya'daha Victoria ee bixiyayaasha adeegyada ama tas-hiilaadka loogu talagalay carruurta ama shaqaaleeya carruurta. *Xeerka Daryeelka iyo Ammaanka Ilmaha (Xeerka) 2005* ayaa dejiyey hay'adahaas ku haboonaan kara Heerarka Ammaanka Ilmaha.

Heerarka Ammaanka Ilmaha waxay bixiyaan qaabka lagu caawiyo haya'daha si ay u yeeshaan dhaqanka, nidaamyada iyo siyaasadaha si loo asaaso hay'adda ammaanka ilmaha oo ay usii waddo xoog-saarista Ammaanka ilmaha.

Waxaa jira saddex sharci oo waaweyn iyo todoba heer oo ka caawiya haya'daha si wax looga qabto meelaha ugu muhiimsan ee halista ah.

Xaashidani waxay bixisaa tallaabooyinka ugu horreeya tusaale ahaan oo laga caawinayo haya'daha inay bilaabaan hirgelinta Heerarka Ammaanka Ilmaha. Haya'dahu waxay u baahan karaan inay qaadaan tallaabooyin dheeraad ah si ay ay u noqdaan kuwo si buuxda ugu hoggaansan.

## Maxay yihiin Shuruucda Heerarka Ammaanka Ilmaha?

Carruurta qaarkood waxay khatar u yihiin xad-gudub, ku salaysan da'da, jinsiga, asalka dhaqanka, iinta ama xadgudub hore ama dayac. Haya'dahu waa inay qaadaan talaabooyin lagu hormarinayo hab-dhaqameedkooda ammaanka ilmaha ayagoo tixgelinaya baahida carruurta ee ka soojeeda asalada kala duwan. Heerarkan ayaa ka caawinaya haya'daha inay xooga-saaraan qaabkooda iyagoo bixinaya saddexdan mabda oo is-daboolaya:

- kor u qaadista ammaanka dhaqaneed ee carruurta Aboorjiinka ah
- Kor u qaadida amaanka dhaqaneed ee carruurta ka soo jeeda asallada dhaqaneed iyo luqadeed ku kala duwan

- kor u qaadista ammaanka carruurta iinta leh.

### Tallaabooyinka ugu horreeya ee lagu fulinayo shuruucda waxaa ka mid ah:

Lahaanshaha habka dulqaad-la'aanta ee takoorka	siinta macluumaadka qaababka la heli karo ee loogu talagalay carruurta curyaamiinta ah iyo asalka dhaqamada iyo luqadaha kala duwan
Taageerada shaqaalaha, carruurta, iyo qoysaska si ay u ixtiraamaan dadka ka soo jeeda dhaqamada kala duwan	aqoonsiga iyo ixtiraamida wakhtiyada muhiimka u ah dhaqamada kala duwan
Abuurista jawi muuqaal ah oo muujinaya sawiro wanaagsan oo dadka ka soo jeeda dhaqamo kala duwan iyo awoodo kala duwan	si firfircoon u raadinaya ugana hadlaya qoysaska wixii ku saabsan sida ay u doonayaan inay uga qayb qaataan

### Maxay yihiin heerka Ammaanka Ilmahu?

	Heerrarka	Tallaabada Kowaad
<b>Heerka kowaad</b>	Xeeladaha lagu abuurayo <b>dhaqanka haya'deed ee Ammaanka ilmaha</b>	Magacow guulaystaha ammaanka ilmaha ee kooxaha hoggaaminta oo ka hadli kara waxa uu la macno yahay qorshaha Ammaanka Ilmaha ee shaqaalaha iyo tabaruceyaasha.
<b>Heerka Labaad</b>	<b>Qorshaha amniga ilmaha</b> ama bayaan ku saabsan ballanqaadka Ammaanka ilmaha	U samee qorshaha Ammaanka ilmaha ama bayaan ku saabsan ballanqaadka oo u shaqeeya haya'ddaada iyo waxqabadkeeda.
<b>Heerka Saddexaad</b>	<b>Asluubta anshaxa</b> taas oo dejisa rajooyin cad oo ku habboon habdhaqanka carruurta	Samee asluubta anshaxa kaas oo lala tashanayo shaqaalaha, tabaruceyaasha iyo carruurta.
<b>Heerka Afraad</b>	Baadhitaan, kormeerid, tababar iyo <b>falalka xogaha insaanka</b> kuwaas oo yareynaya khatarta xad-gudubka ilmaha ee shaqaalaha cusub iyo kuwa hadda jira	Dib-u-eegista falalka xogaha insaanka oo qaada talaabo si loo hubiyo diirad saarida Ammaanka ilmaha.
<b>Heerka Shanaad</b>	Habraaca <b>ka jawaabista iyo ka warbixinta</b> xadgudubka ilmaha oo la tuhunsan yahay	Hubso inaad hayso habab cad oo ah dareenka loo baahan yahay in la soo jeediyo oo la gaarsiyo labadan haya'dooda dhexdooda iyo sidoo kale qoysaska iyo carruurta la shaqeeya haya'ddaada. Haddii haya'daada ay sidoo kale ku khasban tahay inay u hoggaansanto Mashruuca Anshaxa la soo-sheegi karo, waa inaad halkan ku dartaa.
<b>Heerka Lixaad</b>	Xeeladaha <b>si loo aqoonsado loona yareeyo ama looga takhaluso khataraha</b> xadgudubka ilmaha	Kala hadal oo diiwaangeli wixii khalad ah ee waxqabadka ama adeegyada aad siiso adoo qaadaya tallaabooyin lagu yareynayo khatarta.
<b>Heerka Todobaad</b>	Xeeladaha lagu dhiirigelinayo <b>ka qaybgalka iyo xoojinta caruurta</b>	Uhel fursado carruurta si loola wadaago ra'yigooda iyo fikradoodooda oo la maqlo.

## Meesha caawimaada laga hello

Waxaad la xiriiri kartaa Guddiga adigoo:

- Telefoonka: (03) 8601 5281
- Email: [contact@ccyp.vic.gov.au](mailto:contact@ccyp.vic.gov.au)

Waxa kale oo aad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan website-ka

Komishanka: [www.ccyp.vic.gov.au](http://www.ccyp.vic.gov.au)

Haddii aad u baahan tahay turjumaan, fadlan wac Adeega Turjumaada Qoraalka iyo Af-celinta 13 14 50 oo weydii inay la xiriiraan Guddiga Carruurta iyo Dadka Dhalinyarada ah 03 8601 5281.

